



XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WAAJIBAADKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS

QEEXIDDA XAFIISKA

- Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHG) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) waa hay'ad dastuuri ah, madax-bannaan oo heer federaal ah si waafaqsan Qodobka 114aad ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee 2012, sidaas oo kale waa hay'adda ugu sarreysa ee ka masuulka ah dhowrista iyo baarista hantida dowladda sida ku cad Qodobka 4aad ee Sharci Lr. 14, 2023.
- XHG waxa uu fuliyaa mabaadi'da dowlad wanaagga, hufnaanta, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka ku saleysan ka hortagga lunsiga hantida dowladda, waxa uuna sameeyaa hantidhowris madax-bannaan oo sanadle ah si waafaqsan Sharci Lr. 17, ee 2019 iyo Sharci Lr. 14 ee 2023,
- XHG marka uu gudanayo hawlihiisa hantidhowriseed waa ka madax-bannaan yahay dhammaan laamaha dowladda, mana jiro amar ama kor-joogteyn uu ku leeyahay qof ama maamul kale, waxa uuna u-hoggaansamaa Dastuurka iyo shuruucda kale ee dowladda oo keliya.



WAAJIBAADKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS

Wajjibaadka XHG ee JFS waxaa saldhig u ah Sharciga XHG ee JFS (**Sharci Lr. 14 ee 10/09/2023**), Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud (**Sharci Lr. 17, 25/12/2019**), Sharciga libka Qaranka (**Sharci Lr. 22, 09/08/2016**) iyo wax-ka-beddelkiisa (**Sharci Lr. 20, 05/02/2020**) iyo sidoo kale sharciyada xiriirka la leh hawsha mar kasta socota, marka la soo koobana wajjibaadka XHG waxa ay yihiin:

1. In uu baaris dhammaystiran ku sameeyo dhammaan hay'adaha dowladda iyo shirkadaha dowladdu leedahay ama qeybta ka tahay, isaga oo sameynaya baarisyada kala ah; Maaliyadda, U-hoggaansanaanta Sharciga, Waxqabadka, Baaritaannada Gaar ah sida; Nidaamka Tiknoolojiyadda iyo Baarista Fatashka.
2. In uu bixiyo talooyin lagu xoojinayo isla-xisaabtanka, daah-furnaanta iyo hufnaanta nidaamka maamulka maaliyadda ee Dowladda, sidoo kalena lagu saxayo khaladaadka ka soo baxay baaritaannada uu Xafiisku sameeyey.
3. In uu hubiyo in si sax ah loo isticmaalay hantida iyo khayraadka guud, kor-u-qaadista isla-xisaabtanka dhinacyada kala duwan sida dakhliga, kharashaadka, mashaariicda raasumaalka, deeqaha, qandaraasyada, hantida (guurto iyo ma-guurto) iyo deynta dowladda.
4. In uu dib-u-eegis iyo diiwaangelin ku sameeyo awoodsiinta kharash bixinta (F16) kadib marka la isticmaalo, inta aan la soo dalban kharash bixin kale.
5. In uu dhowro hufnaanta maaliyadeed iyo u hoggaansanaanta sharciga ee hay'adaha dowladda, isaga oo qiimeynaaya wax-ku-oolnimada, beekhaaminta iyo waxtarka dhaqaalaha hawlaha dowladda.
6. In uu ogaado wixii khaladaad ah ee dhacay, uuna sidoo kale tilmaamo gaabisyada wax-ka-qabashada u baahan.
7. In uu dib-u-eegis iyo diiwaangelin ku sameeyo dhammaan qandaraasyada iyo heshiisyada ay hay'adaha dowladdu la galaan dalal, shirkado iyo shakhsiyaadba.
8. In uu diiwaangeliyo oo saxiixo Dikreetooyinka ka soo baxa madaxda sare ee dowladda sida Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS iyo Madaxweynaha JFS ka hor inta aan lagu soo saarin Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

9. In uu dowlad muhiim ah ka qaato ilaalinta dowlad-wanaagga isaga oo abuuraya dhaqan maamul maaliyadeed oo xilkas ah oo dowladda dhexdeeda ah.
10. In uu diyaariyo warbixinnada noocyada kala duwan ee baarista hantidhowrka ee hay'adaha dowladda, waxa uuna la wadaagaa hay'adaha la baaray, Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha JFS, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, iyo guud ahaan dadweynaha.
11. In uu la wadaago warbixinno gaar ah Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka haddii natiijada baarista ay ka soo baxdo tuhun la xiriira fal-dembiyeed dhacay.
12. In uu leeyahay xasaanad aan dacwad lagu oogi karin, inta uu ku guda jiro gudashada hawlaha caadi ah ee Xafiiska, haddii aysan jirin fal-dembiyeed cad oo uu gacanta kula jiro.
13. In uu ka hortago fal-dembiyeedyada musuqmaasuqa iyo wax-is-daba-marinta, isaga oo sameynaya Baaris Fatash ah oo lagu xaqiijiyo ficillada noocaas, kadibna warbixin la wadaaga hay'adaha awoodda u leh si looga qaato tallaabo sharci oo ku habboon.
14. In uu joojin karo dhaqdhaqaaqa xisaabta socota ee hay'ad kasta oo uu baarayo, isaga oo sidoo kale maxkamadda awoodda u leh si toos ah uga codan kara in safarka laga joojiyo cid kasta oo uu Xafiisku baaris ku wado.
15. In uu sameeyo baaritaanno gaar ah oo aan waqti ku xaddidneyn, iyada oo uu sameeyo baaritaannadaas mar kasta oo uu Xafiisku go'aansado ama ay ku codsadaan Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ama midkood ama hay'adaha kale ee dowladda.
16. In uu xiriir wada shaqeyn ah iyo mid xirfadeedba la yeesho Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.
17. XHG waxa uu xubin ka noqon karaa, sidoo kalena jago ka qaban kara Ururada Hantidhowrka Sare ee Caalamiga ah.
18. In uu si madax-bannaan u go'aamiyo qaab-dhismeedka Xafiiska, iyada oo la tixraacayo Qodobka 15aad ee Sharci Lr. 14.